Utdannings-
direktoratet

# PPT iyo kaalmada waxbarashada gaarka ah

Haddii canuggaagu wajahayo caqabado gaar ah, asaga ama ayadu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo kaalmada waxbarashada gaarka ah. Canuggaagu wuxuu heli karaa kaalmada noocaas ah laga bilaabo marka uu dhasho, ayadoo aan loo eegayn in uu tago rowdada iyo in kale.

Kaalmada waxbarashada ee gaarka ah waxaa, tusaale ahaan, loo siin karaa qaab tababar dhanka jirka ah, niyad dhiska canugga ama tallo bixin loogu talagalay shaqaalaha rowdada. Ka waalid ahaan waxaad had iyo jeer xaq u leedahay in aad hesho talo bixin. Kaalmada lagu siinayo waa in ay waafaqsan tahay baahiyaha canuggaaga.

Haddii adiga, ama dadka kale ee yaqaana canuggaaga, ay ka welwelsan yihiin hormarkiisa ama hormarkeeda, dowladda hoose iyo PPT waa inay qiimeeyaan ayna siiyaan talo ku saabsan waxa canuggaagu u baahan yahay.

PPT waa adeeg dadweyne kaasoo sameeya qiimayn qoto dheer (oo luuqadda Noraway lagu yiraahdo: sakkyndig vurdering), taasoo ah qaab dukumiinti muujinaya in canuggu u baahan yahay kaalmada waxbarashada gaarka ah iyo in kale. Dowladda hoose waa in meelmarisaa go'aanka shakhsiga (luuqadda Norway lagu yiraahdo:enkeltvedtak) kaasoo ku saabsan in canuggu xaq u leeyahay kaalmada waxbarashada gaarka ah iyo in kale, iyo waxa kaalmadu noqonayso. Mar kasta racfaan waad ka qaadan kartaa go'aanka.

## Waa maxay PPT?

PPT waxay siisaa tallo bixin rowdooyinka iyo dugsiyada talooyinkaas oo ku saabsan isu diyaarinta caruurta, dadka da'yarta ah iyo dadka waaweyn ee qaba baahiyaha gaarka ah. PPT waxay ka qayb qaadan kartaa wadashaqayn qaybo badan iskugu jirta oo heer maxali ah, tusaale ahaan adeegga caafimaadka ama Adeegga Xannaanada Caruurta Norway (luuqadda Norway lagu yiraahdo: barneverntjenesten), iyo heer qaran, tusaale ahaan adeegga waxbarashada gaarka ah ee qaranka (luuqadda Norway lagu yiraahdo: Statped). PPT waxaa lagu maamulaa qarsoonaanta sirta.

## Maxaad ka filan kartaa dowladda hoose?

Dowladda hoose waa in ay

- xaqiijisaa in danaha canugga loo ilaaliyay sida ugu wanaagsan
- ku lugyeelato idin lana taliso adiga iyo canuggaaga kahor inta aysan qaadan go'aan saamaynaya canuggaaga
- wareysiyo ka qaaddo canugga iyo waalidiinta ayna samayso qiimeynta lagama maarmaanka u ah canugga

- codsato in PPT ay ku siiso qiimayn qoto dheer haddii aad ka codsato, iyo haddii dowladda hoose ama xanaanada ay qabto fikradda ah canuggu u baahan yahay kaalmada waxbarashada gaarka ah
- meelmariso go'aanka shakhsiga (luuqadda Norway lagu yiraahdo: enkeltvedtak) kaasoo sheegaya in canuggu xaq u leeyahay kaalmada waxbarashada gaarka ah iyo in kale, iyo waxa kaalmadu noqonayso
- canugga siiso kaalmada waxbarashada gaarka ah sida ku qeexan go'aanka shakhsiga
- ku siiso talo bixin loogu tala galay waalidka
- xaqiijiso in warbixinta sannadlaha ah laga diyaariyo kaalmada waxbarashada gaarka ah iyo hormarka iyo horusocodka canuggaaga

### Maxaad samayn kartaa?

Ka waalid ahaan, waxaad

- dalban kartaa in dugsigu qiimeeyo in canuggaagu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah
- waxaad tabashadaada kala hadli kartaa PPT iyo dugsiga kahor inta aadan soo gudbin
- waa inaad ku lugyeelataa oggolaanshahaagana bixisaa kahor inta dugsigu codsan in PPT ay qiimayn ku samayso canuggaaga
- waa in aad ku lugyeelataa aqbalaaddadadana bixisaa kahor inta ismaamulku uusan go'aansan in canuggaagu u baahan yahay in uu qaato kaalmada waxbarashada gaarka ah
- waa in aad heshaa warbixinta sannadlaha ah ee qoraalka ah ee ku saabsan waxbarashada gaarka ah ee canuggaagu helaayo iyo qiimaynta horumarka iyo horusocodka canuggaaga
- waxaad gudbin kartaa racfaan haddii canuggaaga aan la siin waxbarshada gaarka ah
- waxaad racfaan ka qaadan kartaa waxa la baranaayo, la meelmarinayo ama ururada kaalmada waxbarashada gaarka ah